

# Waraaqda Wararka Xajmiga Shaqada Janitorial



Maajo 2020

Tirsiga 4, Majalladda 1




## Waxa aanu ka shaqeynaynay: Dulmarka Mashruuca

Kooxdeennu way mashquulsanayd – waxaannu dhammeynay kooxaha arrimaha gaarka ah isla-falanqeeya, 1:1 wareysiyada rabshadaha, iyo sahanka gobolka oo dhan ayaa xirmay. Qiimaynta culeyska shaqada (dabagalka shaqada) ayaa socda. Waad ku mahadsan tihiin dhammaan intii ilaa hadda ka soo qeybgashay, waayo-aragnimadiina iyo fikradahiinna waa muhim!

Waxaannu helnay in ka badan 600 jawaabood oo ku wajahan sahanka gobolka oo dhan ahaa, waxaannu ku dadaali doonaa dhowrka bilood ee soo socda in aan idinkaaga soo warbixinno waxa ay sahnado noo sheegaan ee ku saabsan waayo-aragnimada goobta shaqada ee xannaaneyaasha/dadka gacanka ku haya dhismeyaasha.

## Dulmarka Mashruuca: Dadka, Soo-bandhigyada, iyo Daabacaadaha

Luulyo 2018 - Jannaayo 2020\*



### Xaqqiigo Raadin



### Cilmi-baarayaasha waxaa ay sameeyeen:

**9 Kooxood oo Isla-falanqeeya Arrimo Gaar ah** oo loogu talagalay macluumaadka raadraaca ee laga helo Xannaaneyaasha/Dadka gacanta ku haya dhismeyaasha (Af-Ingiriis iyo Af-Isbaanish) (Sannadka 1)

**19 wareysiyo shakhsi ahaan ah** oo lala yeeshay Xannaaneyaasha / Dadka gacanta ku haya dhismeyaasha oo ku saabsan rabshadaha ay kula kulmeen goobaha shaqada. (Af-Ingiriis iyo Af-Isbaanish) (Sannadka 1-2)

**Booqashooyin goobo badan lagu tago** oo loogu tagey kormeerayaasha ama dadka dabagalka ku sameeyo Xannaaneyaasha / Dadka gacanta ku haya dhismeyaasha gobolka oo dhan si loo cabbiro culeyska shaqada (Way socdaan, Sannadka 2-3)

### Walaacyada ugu badan ee ay ka warbixiyeen Xannaaneyaasha / Dadka gacanta ku haya dhismeyaasha waxay ahaayeen:

CULEYS SHAQO

XIRIIRRADA

KORMEERAHA/MAAREEYAHA


DHAAWAC IYO JIRRO

DHAQANKA BEDQABKA

QALABKA IYO SAHAYDA  
NADAAFADDA

DHIBAATOYINKA LAGALA KULMO  
MUSHAARKA IYO DHEEFAHA

WALBAHAAR



## Gaarista iyo Shaqo-qorista

- Waxaannu ka qaybgalney **28 Dhacdooyin** oo lagu gaarey 200+ qof.
- Waxaannu la shaqeynay **11 urur oo ah ururrada daneeyayaasha bulshada.**
- Waxaannu ka soo muuqanay **4 Cidaacadood** oo gaaray qiyaastii 2000 oo dhageystayaal.
- Waxaannu soosaarnay **1 Fiidiyow YouTube** oo ay daawadeen in ka badan 3790.
- Waxaannau daabacnay **Wargeys iyo Warqad Talo-bixin** oo loo diray bishii Agoosto 2019 ilaa **1,170** qofood.

## Sahanka Gobolka oo Dhan

In ka badan **600** sahanno ayaa la **dhammeeyay** laga bilaabo bishii Nofembar 2019 – Jannaayo 2020.

Sahanka waxaa lagu heli karay boostada, telefoonka, ama online-ka, wuxuunna ahaa luuqado badan.

*Mowduucyada waxaa ka mid ah:*

- Qabanqaabooyinka shaqada, hawlaha iyo dibad-oolyada.
- Khataraha, dhaawacyada, xaaladaha caafimaad, qalabka, tababarka, iyo jawiga bedqabka.
- Walaacyada ujuurrada iyo saacadda, takoorka iyo dhibaateynta.
- Xogta Bulshada.

## 8 Languages

**Wargeyska, Warqadda Talo-bixinta, iyo Sahanka Gobolka oo Dhan ah**

- Af-Ingiriisi
- Af-Isbaanish
- Af-Fiitnaamiis
- Af-Soomaali
- Af-Amxaaro
- Af-Ruush
- Af-Bosniyan – Wargeys iyo Warqad Talo-bixin
- Af-Shiinees (Caadiga iyo Kan La Fududeeyay) – Sahanka

Waa maxay wax soosaarka ama soo bandhigyada aad jeclaan lahayd in laga helo Daraasada Culeyska Shaqada Xannaaneynta Dhismayaasha? Luuqadee(luuqadahee)?

Iimaylka [JanitorStudy@Lni.wa.gov](mailto:JanitorStudy@Lni.wa.gov), ama

1-888-667-4277, riix 2 oo loogu talagalay Sahanka Culeyska Shaqada ee Dhismo Xannaaneeyaha

**Soo socda:** Warbixinta ugu horreysa ee ku socota Sharci-dejinta Gobolka Washington oo ay la socdaan natiijooyinka ugu horreeya ee laga helay dhammaan qaybaha mashruuca waxaa baraha internet-ka lagu daabaci doonaa xagaaga 2020.

\*Golaha Sharci-dejinta Gobolka Washington wuxuu maalgeliyay SHARP si ay u sameeyso daraasadan laga bilaabo 1da Luulyom 2018 ilaa 30 Juun, 2022.